



taasi waa xidid dartiiye Salaada jooji qadarkii ayaamaha xaydku kugu dhici jiray, ka dibna ka qubayso oo Salaada tuko

Caa'isha, mu'uminiinta Hooyadood- Allaha ka raali ahaadee- waxaa laga wariyey inay tiri: Faadumo Bintu Abii Xubaysh ayaa Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee su'aal waydiisay waxayna tiri: Anigu dhiig furan baan leehay oo daahir ma noqdo ee Salaada ma ka tagaa? wuxuu yiri: "maya, taasi waa xidid dartiiye Salaada jooji qadarkii ayaamaha xaydku kugu dhici jiray, ka dibna ka qubayso oo Salaada tuko."

[Xadiis Saxiix ah] [Xadiis la isku waafaqay]

Faadumo Bintu Xubaysh Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee waxay waydiisay oo tiri: aniga dhiigu igama joogsado oo wuxuu iga socdaa waqtii dhaafsan mudadii dhiiga caadadu iga socon jiray, ee xugunkiisu ma yahay xugunka dhiiga xaydka oo Salaada ma joojiyaa? Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu ku yiri: kaasi waa dhiig istaxaado ah waana dhiig jiro ah wuxuuna ka soo baxaa xidid Raximka ku jira ee ma aha dhiigii caadada. Marka aad gaadho waqtigii aad heli jirtay dhiiga caadada ee bilaha ah intaanu kugu dhicin dhiiga istixaadadu, jooji Salaada, soonka iyo wixii loo diidi jiray mida xaydka qabta. Hadii mudadaas qadarkeedu dhamaado, waxaad noqonaysaa mid xaydka daahir ka noqotay, meesha dhiiga iska dhaq, ka dibna si kaamila uga qubayso xadaska, oo tuko.

<https://sunnah.global/hadeeth/so/show/3029>